# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 4aad** Muqdisho, 15 Setember, 1976, L. 5

*Laana faafinta rasmiga ah oo ka tirsan madaxtooyada*

**FAAFIN BIL SOO BAXA** جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadu waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI


SHARCI L. 7 EE Seteembare 76, *Meel marin dhexmaray J.D.S. Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Dimoqraadiga Dadka Yemen.* Bogga 63

SHARCI L. 8 ee 6 Seteembare 76, *Meel marin Heshiis ka dhaxeeya J.D.S. iyo Dawladda Midowga Soofiyeeti.* » 64

SHARCI L.9 ee 6 Seteembare 76, *Meel marin Heshiis dhexeeya J.D.S. iyo J. Carabta Masar* » 65


## BOGGA LABAAD

## XEER


XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 31 Luuliyo 76, *Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska L. 21* » 66

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 31 Luuliyo 76, *Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska oo lagu wareejiyey Shaqaalaha Dowladda L. 22* » 68

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S.16 Agoosto 76, *Xeer Nidaamiye Dawladeed ee Dhulka Beeraha L. 23* » 70

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 6 Seteembare 76, *Baabuurta Cusub L. 24* » 74



**Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho**

XEER MADAXWEYNAHA JDS 16 Seteembare 76, *Magacaabid Guddoomiyaha Qor. Dawladda L. 25* » 76

XEER MADAXWEYNAHA JDS 16 Seteembare 76 *Magacaabid Guddigga Dhexe ee Baarista L. 26* » 77

XEER MADAXWEYNAHA JDS 18 Seteembare 76, *Gunno habeyn dhax gudaha iyo tan dibadda ee Xubnaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S.t L. 27* » 78

---

## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

# BOGGA KOOWAAD

# SHARCI

(SHARCI L.7) 6. Set. 1976 Meel marin heshiis dhexmaray Jamhuuriyada Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Mimoqraadiga Dadka Yemen.

*M A D A X W E Y N A H A*

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada kala ah 17, 18, 19, ee soo baxeen 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 Luuliyo 1976;

MARKUU RKAY Go'aankii Guddiga Siyaasadda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taariikhdiisuna aheyd 26.8.1976.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay Heshiiskii dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Dadka Yemen ee lagu kala saxiixday Magaalada Cadan Bishii Luuliyo 24dii 1974, kuna saabsana (traffic Rights) ee Diyaaradaha labada Dal Soomaaliya iyo Jamhuuriyada D. Dadka Yamaneed.

Qod. 2aad

Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan wuxuu yeelan doonaa Astaan Sharci ah, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada looga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho; 6 Set 1976

*MADAXWEYNAHA J.D.S.*

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

**(SHARCI L. 8) 6 Set 1976 Meel marin ka dhaxeeya J.D.S. iyo Dawladda Midowga Soofiyeeti.**

## *M-A D A X W E Y N A H A*

ISAGOO ARKAY. Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada kala ah 17, 18, 19, ee soo baxeen 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 Luuliyo 1976

MARKUU RKAY Go'aankii Guddiga Siyaasadda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taariikhdiisuna aheyd 19.8.1976.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay Heshiiskii dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Midowga Soofiyeeti ee lagu kala saxiixday Magaaladda Muqdisho bisha 19.7.1976, kuna saabsan iskaashi xagga dhaqaalaha ee labada dal.

Qod. 2aad

Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan wuxuu yeelan doonaa Astaan Sharci ah, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada looga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho; 6 Set 1976

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
*Madaxweynaha J. D. S.*

(SHARCI L. 9)6 Set 1976 Meel marin heshiis dhexmaray, Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyada Carabta ee Masar.

## MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY. Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada kala ah 17, 18, 19, ee soo baxeen 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 Luuliyo 1976

MARKUU RKAY Go'aankii Guddiga Siyaasadda Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, taariikhdiisuna aheyd 26.8.1976.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay Heshiiskii dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soomaaliya iyo Dawladda Masaarida ee lagu kala saxiixday Magaalada Qaahira bishii Agoosto 15dii 1973, kuna saabsanaa (traffic rights) ee Diyaaradaha labada Dal Soomaaliya iyo Masar.

Qod. 2aad

Heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan wuxuu yeelan doonaa Astaan Sharci ah, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada looga dhaqmo Dalka Soomaaliyeed.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho; 6 Set 1976

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
*Madaxweynaha J. D. S.*

# BOGGA LABAAD

**XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 31.7.76 Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska ooka mid noqondoona Shaqaalaha Dawladda. L. 21**

## MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska,

ASAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska kuna soo sheegay warqaďiisa lambar CIID/C/12-37 ee 28.7.76,

ASAGOO DHEGEYSTEY: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Saraakiisha Magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo ka tirsan Ciidanka Bolliska laga bilaabo 1aad Agoosto 1976ka waxa loo wareejiyey oo ay ka mid noqon doonaan shaqaalaha Dawladda iyadoo mid walba lagu meeleynayo jago u dhignta derejada uu haatan sito:

1. S. Guuto Muuse Duble Samatar:
2. G. Sare Maxamed Jaamac Bedele
3. » » Ismaaciil Cali Yuusuf
4. » » Khaliif Xaaji Faarax
5. » » Maxamed Cali Caddow (Cabdani)
6. » » Cabdalla Xaaji Axmed
7. » » Xuseen Faarax Warsame
8. G. Dhexe Cabdullaahi Sanuura
9. » » Yuusuf Shuuriye Maxamuud
10. » » Cali Aadan Bootaan
11. » » Cabdulcasiis Olol Diinle
12. G/le Maxamed Faarax Cali
13. »
14. » Xasan Axmed Iimaan
15. » Maxamuud Maxamed Samantar

16. » Maxamuud Xasan Cali
17. » Maxamed Oogle Cilmi
18. » Maxamed Cartan Ismaaciil
19. » Xuseen Rooble Siyaad
20. » Cabdi Yuusuf
21. Dhame Ibraahim Jaamac Urdoox
22. » Maxamed Cabdi Xasan (Unguugo);
23. » Maxamed Cabdi Muumin
24. » Khaliif Axmed Sugow
25. » Xaashi Maxamed Guuleed
26. L/Xid/le Mire Xaydar Cawaale
27. » Cilmi Xirsi Cali
28. » Nuur Muuse Cali
29. » Cilmi Jaamac Xasan
30. » Salaad Yuusuf Samantar
31. Xidd Muuse Cabdullaahi Mahdi

Qodobka 2aad

Agaasinka guud ee shaqaalaha Dawladda ayaa loo xilsaaray in uu dhammaystiro wax allale wixii la xiriira wareejinta jaallayaashaas, Madaxtooyadduna waxay waraaq gaar ah ku soo saari doontaa mid walba hay'adda loo beddlay oo uu ka shaqeyn doono.

Qodobka 3aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan geli doonaa waxaana lagu soo saari doonaa faafin rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho; 31.7.1976.

**WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA**
**(S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)**

**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)**
**MADAXWEYNAHA J. D. S.**

**WAAN ARGNAY EE DIIWAANGELINNAY Diiwaanka lam. 5 Bogga lamb 90 Muqdisho, 21 Agoosto. 1976. Hantidharka Guud**

**G. Dhexe Cabdilaahi Warsame Nuur**

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 31.7.1976 Saraakiil ka tirsan Ciidanka Boolis, ka oo lagu Wareejiyay Shaqaalaha Dawladda L. 22)

*MADAXWEYNAHA*
*J. D. S.*

ASAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliiska;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliiska,

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliiska kuna soo sheegay Warqadciisa lambar CIID/C/12-37 ee 28.7.1976;

ISAGOO DHEGEYSTEY: Taladii uu soo jeeddi Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin oo ka tirsan Ciidanka Booliiska laga bilaabo 1da Agoosto 1976ka waxaa loo wareeyey oo ay ka mid noqon doonaan Shaqaalaha Dawladda yadoo mid walba lagu meeleynayo jago u dhiganta darajada uu haatan sito.

1) G/le Cabdullaahi Warsame Maxamed

2) Dhamme Maxamed Muuse Jaamac

Qodobka 2aad

Agaasinka Guud ee Shaqaalaha Dawladda ayaa loo xilsaaray in uu dhammeystiro wax allaale wixii la xiriira wareejinta Jaallayaashaas, Madaxtooyacuna waxay waraaq gaar ah ku soo saari doontaa mid walba hay'adda loo beddelay oo uu ka shaqeyn doono.

Qodobka 3aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan geli doonaa waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 31.7.1976

*(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*
*MADAXWEYNAHA*

*WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA*
*(S. Gaas Jaamac Maxemd Qaalib)*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY Diiwaanka lam. 5 Boga lamb. 91 Muqdisho, 21.Agoosto. 1976. Hantidhawrka guud**

**G. Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur**

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 16.8.1976 XEER Nidaamiye Dawladeed Beeraha L. 23).

*MADAXWEYNAHA*
*J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Xaashida Koowaad iyo tan labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga tiradiisu tahay 73 ee soo baxay 21ka Oktoobar;

ISAGOO AQOONSADAY: Baahida loo qabo in lasameeyo xeer Nidaamiye Dawladeed ee ku saabsan dhulka beeraha;

IYADOO AY SOO JEEDISAY: Wasaaradda Beeraha.

WUXUU XEERAYAA

XAKDA DHULKA

Qodobka 1aad

1. Shirkadda gaarka ah ee ku xusan qodobka 8aad qaybta 2aad ee Sharciga dhulka beeraha waxaa loola jeedaa shirkad ay Dawladdu qayb ku lahayd,

2. Shirkadda khaaska ee ku xusan qodobka 8aad qaybta 3aad ee sharciga dhulka beerah waxaaa loola jeedaa shirkad ay Dawladdu qayb ku leedahay;

Qodobka 2aad

Shirkadda qaarka ah way yeelan kartaa dhul beereed ee dhaafsan xadka loo yeelay dhul bixinta sida uu sheegayo Qodobka 8aad, qaybta 2aad ee sharciga dhulka beeraha.

Qodobka 3aad

Shuruudaha siismada ruqsadda dhulka la beerto ee la siiyo shirkadda gaarka ah waxa weeye:-

— In Shirkadda gaarka ah ay tahay mid ku dhisan sharci Dawladdu aqoonsatay;

— in shirkadda gaarka ah ay leedahay awood lacageed kuna fillantahay tacabka dhulka la siiyey;

— inay shirkaddu keento qoorsho cad sda dhulka ay wax uga qabaneyso;

— qoorshaha shirkaddu waa inuu yahay mid muddo dheer (long term) iyo mid muddo gaaban (short term ee koobayo dhaqaale, siyaasad farsamo, caddeynayna habka ugu wanaagsan ee loo isticmaale dhulka, isticmaalkaasoo leh saldhig cilmiyeed,

— in Shirkadda gaarka ah aysan ka hor-imaan xeerarka had iyo jeer Dawladdu u dejisa dhulka beeraha.

Qodobka 4aad

Wasiirka Wasaaradda Beeraha wuxuu awood u leeyahay in uu xadido dhulka la siinayo shirkadda gaarka ah.

## QAYBTA LABAAD

### *HABKA LA WAREEGIDDA DHULKA BEERAHA*

*Qodobka 5aad*

Wasiirka Wasaaradda Beeraha wuxuu awood u leeyahay inuu wareejiyo dhul kastaa ee beeran ama la beeran jray danta guud sida, ku qoran qodobka 10aad sharciga dhulka.

Qodobka 6aad

Dhulka beeran oo ka badan xadka lagu sheegay qaybta koowaad iyo tan labaad, qodobka 8aad ee sharciga dhulka beeraha, waxaa sii dhaqmi karaa sida uu sharciga leeyahay. Dhulka baryada ah oo muddo laba sanso lagu dhaqmin, waa ka wareegayaa qofka horay ugu dhaqami jiray.

Looma oggola qofka dhulka laga wareejinayo inuu tilmaamo ama heshiis la sameeysto qofka loo wareejinayo dhulka.

Dhulka la wareejinayo waa inuu shaadaa dhul is-haysta.

**Qodobka** 7aad

Dhulka lala wareegay waxaa laga bixinaya magdhow hantigelin ah. Hantigelinta la magdhabayo waxaa qiimeynaya guddi ka kooban farsamayaqaano uu soo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Beeraha.

Qodobka 8aad

Qofka la siinayo dhul cid kale laga wareejiyay waa:-

— Inuu Soomaali u dhashay uuna qaan-gaar yahay;

— inuu dhul kale hore u lahayn;

— inuu leeyahay awood uu ku bixin karo magdhow.

Qodobka 9aad

Habka bixinta magdhowga waxaa loo eegayaa sida hoos ku qoran:-
— haddii qiimaha hantigelinta uu ka yaryahay 100,000 shilin, waa in magdhowga lagu bixiyaa muddo 10 bilood ah.

— haddii qiimaha hantigelinta uu u dhexeeyo 100.000 ilaa 300.000 shilin, waa magdhowga lagu bixiyaa muddo 15 bilood ah;

— haddii qiimaha hantigleinta uu ka badanyahay 300,000 shilin, waa in magdhowga lagu bixiyaa muddo aan ka badneyn 18 bilood.

— haddii muddada kor ku xusan magdhowga lagu bixin waayo, Wasiirka Wasaaradda Beeraha wuxuu awood u leeyahay in uu dhulkaas dib ugu soo celiyo Dawladda.

Qodobka 10aad

Qofkii dhul beereed doonayo in dhaqmaad loo siiyo waa in uu soo weydiistaa Degmada dhulka ku yaal, waana inuu ku soo weydiistaa warqadda sharciga ah ee qiimaheedu yahay So. Sh. 5/ (Shan shilin) soo ku soo xiraya naqshadda dhulka uu weydiisanayo.

## QAYBTA 3AAD

## *SIISMADA RUQSADDA DHULKA LA TACBAYO*

Qodobka 11aad

Qofka la siinayo ruqsadda dhulka beeraha waa in uu ku tacbaa muddo ku simman laba sanno dhulka la siiyey.

## QAYBTA 4aad

## *SHURUUDAHA BIXINTA CASHUURTA*

*Qodobka 12aad*

Dhulka beeraha oo ay Dawladdu bixisay waa in cashuur laga qaadadaa sannadkiiba mar, iyadoo loo kale bixinyo sida soo socota:-

*BEERALAYDA CAADIGA AH IYO ISKAASHATOOYINKA*

Dhul roobka ku waraaba hektarkiiba So. Sh. 5/

dhulka webiyada ku waraaba hektarkiiba So. Sh. 10/

Shirkadaha gaarka ah, Shirkadaha khaaska iyo beeralayda kele - kelida ah ee beertaan dhirta joogtada ah sida (mooska, liinta cambaha iwm)

dhulka roobka ku waraaba hektarkiiba So. Sh. 30/
dhulka webiyada ku waraaba hektarkiiba So. Sh. 50/

Lacagta cashuurta ee laga qaado beeralayda caadiga ah iyo Iskaashatooyinka waxaa lagu shubayaa khasnadda Dawladda Hoose ee meesha dhulka kuyaal.

Lacagta cashuurta ee laga qaada shirkadaha gaarka ah, Shirkadaha khaaska ah iyo beeralayda keli-kelida ah ee beertaan dhirta joogtada ah sida (mooska, liinta, cambaha iwm) waxaa lagu shubayaa Khasnada Dawladda dhexe.

## QAYBTA 5AAD

## DHAQAN GELIN

### Qodobka 13aad

Kala soohimeynta dhulka beeraha iyo Xoolaha, iyo goofka waxaa si gaar ah loogu caddeyn doonaa xeer nidaamiye dawladeed.

## QAYBTA 6AAD

### Qodobka 14aad

Xeerkan wuxuu u dhaqan galayaa si degdeg ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.

### Qodobka 15aad

Waxaa la amrayaa qof waliba in uu dhowro, ilaaliyo, hirgelinta sharcigan.

Muqdisho 16.8.1976

*Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya*
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 16.8.1976 Baabuur Cusub L. 24).

*MADAXWEYNAHA*
*J. D. S.*

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambaradooda kala ah 17,18, 19 ee soo baxeen 1da luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. yahay 61 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1975, kuna saabsanaa la wareegidda Ganacsiga dibada ka keenka baabuurta iyo toleynta hoosooyinka waaweyn.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 1aad ee Sharciga L. yahay 13 ee soo baxay 9kii Maajo 1976.

MARKUU DHEGEYSTAY: Taladii Wasiirka Gaadiidka

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Wakaaladda Ganacsiga Gaadiidka iyo Qalabka Dayactirka waxay baabuurta Cusub ee ay dalka u soo dejiso ka qaadi doontaa lacagta hoos ku qoran oo u kala baxda hawl wakaaladdu qabatay iyo khidmad.

*B. BAABUURTA DAWLADDA*

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Hawla la xiriira dalabka | 1% |
| 2. | Hawlaha la xiriira giigiijinta iyo garantiiga baabuurka | 4% |
| 3. | Khidmadda:. (Commissione) | 3% |

4. Wakaaladdu waxay qaadi kartaa lacagta giigiijinta iyo garantiiga haddii hawshaas ay qabato oo keliya

*T. BAABUURTA KALE OO DHAN*

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Hawlaha la xiriira dalabka | 1% |
| 2. | Hawlaha la xiriira giigiijinta iyo garantiiga baabuurka | 4% |
| 3. | Khidmadda (Commissione) | 10% |

Qod. 2aad

1. Baabuurka duugga ah ee dalka aan ku soo gelin lacagta adag (hhard currency) ee sharciga lambarkiisu yahay 13 ee soo baxay 9kii Maajo 1976 lagu oggolaaday in dadweynuhu toos dalka u soo gelin karo waxaa Wakaaladdu ka qaadaysaa khibradda hoos ku qoran:

| | |
|---|---|
| 1. Baabuurta shan (5) tan ka weyn | 3 % |
| 2. Baabuurta ah 1½ ilaa shan (5) tan | 5 % |
| 3. Baabuurta 1.5 tan ka yar | 10 % |

2. Baabuurta lacagta kor ku tilmaaman waxaa lagaga qaadayaa qiimaha baabuurta maqaasiinka ku soo gaadho.

Qod 3aad

Xeerkani waxba kama bedldelin habkii looga qaadi jirey baabuurta cashuuraha iyo khidmadaha iwm.

Qod 4aad

Xeerka wuxuu dhaqan gelayaa ka billaabta 1da Sabtambar 1976.

Muqdisho 16.8.1976

*Wasiirka Gaadiidka*
*(Jaalle Maxamed Buraale Ismaaciil)*

*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*
*MADAXWEYNAHA J. D. S.*

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 16.9.1976 Magacaabid Guddoomiyaha Qorshynta Dawladda L. 25).

*M A D A X W E Y N A H A*

*J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Xaanshada 1, 2, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17,18 iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976 kuna saabsan Dhismaha iyo la wareegidda Xukunka Dalka Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed iyo Habka Hoggaaminta Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed fadhigiisu ahaa 3 Luuliyo 1976;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

In Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Weyrax loo magacaabay jagada Guddoomiyaha Qorsheynta Dawladda.

Qod. 2aad

Guddoomiyaha Qoorsheysta Dawladda wuxuu yeelan doonaa gunno iyo xuquuq la mid ah kan ay gaataan Guddoomiyayaalka Hoggaamada Xisbiga H. K. S.

Qod. 3

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 1 Luuliyo 1976.

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho; 16.9.1976

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
*Madaxweynaha J. D. S.*

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 16.9.1976 Magacaabid Guddiga Dhexe Baarista L. 26

*MADAXWEYNAHA*
*J. D. S.*

MARKUU ARKAY: Xaashida 1, 2, iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Sharciyada Lamb. 17, 18, iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976 kuna saabsan Dhismaha iyo habka hoggaaminta Dalka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tir 1 ee Luuliyo 1976;

MARKUU ARKAY: Go'aankii ka soo baxay shirweynihii Aasaasiga Xisbiga Hantiwadaagga ee Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO FULINAAYA: Go'aankii Shirweynaha Xisbiga kor ku xusan;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1aad

Jaallayaasha magacyadooda hoos lagu sheegay, waxaa loo magacaabay Guddiga Dhexe ee Baarista, qof kastana waxaa loo dhiibay xilka hoos ku tilmaaman:

1) Jaalle Dr. Axmed Shire Maxamuud — Guddoomiye
2) Jaalle Cali Xuseen Cabdillaahi — Xubin ku xigeenka Guddoomiyaha
3) Jaalle Maxamuud Maxamed Warseme — Xubin ku xigeenka Guddoomiyaha

Qod. 2aad

1) Guddoomiyaha Guddigga Dhexe ee Baarista wuxuu yeelaa doonaa gunno iyo xuquuq la mid ah kan ay qaataan guddoomiyayaalka Hogaannka Xisbiga H.K.S.

2) Ku-Xigeennada Guddoomiyaha waxay yeelan doonaa gunno iyo xuquuq la mida ah kan ku xigeennada guddoomiyayaalka Hoggaannada Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa 1 Luuliyo 1976, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16.9.1976

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*
*Madaxweynaha J.D.S.*

(XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 18.9.1976 Gunno dhax gudaha iyo tan dibadda ee Xubnaha Golaha Dhexe ee X.H.K.S. L. 27

*M A D A X W E Y N A H A*

*J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17, 18, iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976 kuna saabsasaa Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Habka Hogaaminta Dawladda.

ISAGOO ARKAY: Sharciga la B. 3 ee 5 Jannaayo 1976 oo ku saabsanaa Gunnada Habeyn Dhexe Gudaha iyo kan dibadda ee ay qaataan Wasiirada

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii ka soo baxay Golaha Siyaasiga ee X.H.K.S. fadhigiisuna ahaa 14 Setembere 1976.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod 1aad

Gunnada Habeyn dhaxa Gudaha iyo tan dibadda ee ay xaq u yeelan doonaan Xubnaha Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed jago kastaba ka joogeena waxay la mid ahaaneysaa tan Wasiiraku uu qaato sida ku tilmaaman Sharciga lamb. 3 ee soo baxay 5tii Jannaayo 1976.

Qod. 2

Sharci kasta ama xeer kasta oo aan la socon karin ama ka soo horjeeda Sharicgan waa la buriyay.

Qod. 3aad

Sahcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1 Luuliyo 1976, waxaana lagiu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 18.9.1976

*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)*
*Madaxweynaha J.D.S.*